

## **Barnaamijyada Tallo Bixinta Dugsiga Dhexe Waxay Heleen Tubtoodii**

Gu’gii aan soo dhaafnay, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u dhaqaaqeen sidii ay u hubin lahaayeen dugsi dhexe oo kasta kana mid ah dugsiyada degmada inay leeyihiin barnaamij tallo-bixin diiradana saaraya xidhiidhka dhismaha dugsiga ee ardayda iyo macallimiinta lana siinayo agabyada ay u baahnaayeen sidii ay u kobcin lahaayeen dareenka ah inay dugsiga leeyihiin.

Himilooyinka barnaamijyada tallo-bixintu waa kuwa cad. Higsiyada dugsiyada degmadu ayna wali gaadhin ee dhinaca manhajka wuxuu caawin doonaa qof kasta sidii uu u gaari lahaa himilooyinkaasi.

Enter Dr. Jill Bryant, oo kooxdii ay ku jiraan sanadkii afraad ee meel marinta manhajka Isbedelada Barashada Shucuurta Bulshada(TSEL). Waxaa isla markiiba caddaatay labadoodaba, waa Bryant iyo Joanna Tobin oo ah agaasiime sarre casharada muhiimka ah ee dugsiyada dhexe Dugsiyada Dadweynaha Portland, inay shaqadooda ugu weyni inay tallo bixinta dugsiyada dhexe iyo inay si fiican isku waafajiyaan natiijooyinka TSEL.

“Dhammaanteen waxaan isku raacsanahay tallo bixinta barnaamijyadu inay udub dhexaad u yihiin waxbarashada da’ yarta,” sidaasi waxaa yiri Tobin. “Sidaas darteed, markii aan bilownay inaan dib u fiirino manhajka, waxaan ogaanay in barashada shucuurta bulshada ay dabooleyso wax kasta oo ka mid ah barnaamijka tallo bixinta. Waxaanu ka fikirney inaan isweydiino, waa maxay sababta aynaan labadaasi isugu geyn weynay iyaga oo u wanaagsan labada duniba?”

Barashada shucuurta bulshada waxaa lagu abuuray shan tiir oo iswacyi-galinta, ismaareeynta, xirfadaha xiriirka, iyo go’aan qaadashada mas’uuliyada. Bryant iyo kooxdeedu waxay qaateen mabaa’diida hore iyo dhexda markii ay dooranayeen manhajka TSEL ee ardayda dugsiga dhexe, ugu dambeyn waxaa la gaadhay labo arrimood oo la kala doorto: Dariiq-raadin iyo Waxaan u Qabanaa Dhaqan ahaan.

Manhaj kastaa wuxuu mudnaanta siiyaa casharada kor u qaadaya ardayda sidii ay u abuuri lahaayeen bulshooyin diirada saaraya barashada iyo iyaga oo ku salaysan sinnaan. Haddaba, maadaama ay mabaa’diida bulshada la dhisayo lama huraan u tahay barashada shucuurta bulshada, bulshooyinka dugsiyada dhexe waxaa la siiyey xoriyad ay ku doortaan manhajka fiican ee ku haboon baahiyahooda gaarka u ah.

“Muhiim ayey ahayd inay ka qeybqaadaan ardaydu, macallimiinta, maamulayaasha iyo qoysasku habkii loo dooranayey manhajka,” sidaa waxaa yidhi Dr. Bryant. “ Dariiqaa ayaan u qaabeyneynaa mabaa’diida assaaska u ah barashada shucuurta bulshada.”

Kooxaha dugsiyada degmada waxaa loo xil saaray dib u nashqadeynta qaabka guud ee casharada fasalada dugsiyada dhexe, sidoo kalena waxay hubiyeen inay qeyb uga tagaan jadwalka la tallinta macallimiinta iyaga oo kala hadlaya ardayda arrimaha ku saabsan inay ku ciyaaraan hoolashooda iyo fasaladooda.

“Ka hor sanadkani, dugsiyo fara badan waxay lahaayeen xiisado tallo bixin ah laakiin qaab aan go’aneyn ama qaab,” sidaas waxaa yiri Richard Smith, isaga oo ah agaasiimaha fasalada dugsiyada dhexe ee dib u nashqadeynta dugsiyada degmada. “Tallo bixintu waxay noqotay iyada oo aan lagu tallogalin waqti ay waxyaabo fara badan ay dhacayeen dhinaca kalena ay tilmaamaha waxa ka soo baxayaa uu ahaa mid aad u yar. Hadda, ardayda iyo macallimiintu waxay leeyihiin qaab ay ku caawiyaan ammuurahaasi si loo raadiyo jawi la aamino oo nabadgelyo leh, isla markaas si loo siiyo dabacsanaan ku filan iyada oo wax laga qabanayo waxyaabaha ka dhacaya dugsiyada ay wax ka bartaan.”

Arrinta kale ee mudan in tixgalinta la siiyo marka go’aan laga gaarayo sida loo qaabeynayo barnaamijka tallo bixinta dugsiyada dhexe ee cusub waa qeybo macallimiinta ah in la horumariyo xirfadahooda.

“Waxaan rabnay inaan kaga hadalno arrimaha sinnaanta isla markaana la jaanqaadaya qaabka waxbarashadeena iyo sawirka qallin-jabinta,” sidaasi waxaa yiri Dr. Bryant. “Waxaan sidoo kale rabnay inaan siino barnaamij fursado waxbarasho macallimiinteena. Manhajka ayaa qabanaya arrintaas. Waxay ardayda iyo macallimiinta si wada jir ah u siiyeen fursada ay u wada koraan.”